Boston Medical Centre Ogeysiis Isticmaalka Arrimaha Gaarka kuu ah.
(Notice of Privacy Practices—NPP)

OGYSIISKAAN WUXUU SHEEGAYAA SIDII MACLUUMAADKA KU SAABSAN CAAFIMAADKAAGA LOO ISTICMAALI KARO AMA LOO BIXIN KARO IYO SIDAAD U HELI KARTO MACLUUMAADKAAS. FADLAN SI HABBON UGU DAYMA LAHOW.

Boston Medical Centre (BMC)—Xarunta Caafimaadka Booston, iyo takhaatiirta la xiriirta waxay ku qoraan faylkaaga mar walba oo aad xaruntooda u tagtid baarid ama dawayn. Faylkaaga waxaa ku jira macluumaad khuseeya xanuunakaaga, faxuusadka aad sameysay, diagnosis, iyo biilaka aad bixisay ama lagaa rabo.

Sharcigu wuxuu dhigayaa in ay BMC aysan arrimaha khuseeya caafimaadkaagu ay gaar ahaadaan ayna kula socodsiiyaan sida ay u xafidaan faylalkaaga.

BMC waxaa waajib ku ah inay dhowrto xeerarka u dhigan Ogeysiiska Isticmaalka Arrimaha Khaaska ah (Notice of Privacy Practices—NPP) ee hadda qoran.

Waxaad marwalba ka dalban kartaa nuskhad ama koobi Ogeysiiskan ah meesha aad iska qoraysid ama ka dalbanaysid caafimaadka. Waxaad kaloo ka eegi kartaa Ogeysiiskan mawqica/bogga shabkada caalamiga ah ee: **http://www.bmc.org**.

Ogeysiiskaan wuxuu saameeyaa BMC, takhaatiirta Xarunta Caafimaada ee Jaamacadda Boston (Boston University Medical Center Faculty Plan Foundation), iyo hay'adaha (BMC) iyo shakhsiyadaha hoos ku xusan:

- Xirfad yaqaan caafimaad walba oo loo ogol yahay inuu faylkaaga istibaalka macluumaad ku qoro
- Caafimaad bixiye walba oo ka tirsan shaqaalaha "BMC Medical and Dental"
- Shaqaalaha BMC oo dhan, ay ka mid yihiin shaqaalah caadiga ah, shaqaalaha istibaaladda, iyo kuwa volunteerka ahba.
- Xarumaha Caafimaadka ee Mujtamaca/komiyuuniti ee ka tirsan Boston HealthNet: BMC iyo xarumahu waxay wadaagaan macluumaadka ku saabsan dawaynta, biilalka, iyo caafimaad bixinta ku xusan ogeysiiskan.

SIDA AAN U ISTICMAALI KARNO AMA U FAAFIN KARNO MACLUUMAADKA KU SAABSAN CAAFIMAADKAAGA:

Isticmaal waxaan uga dan leenahay in macluumaadka caafimaadka lagu wadaago BMC gudaheeda. Faafin waxaa loola jeedaa in macluumaadka caafimaada lala wadaago hayado dibadda ah. Waxaan u isticmaali karnaa ama u faafin karnaa macluumaadka caafimaadka sida hoos ku xusan annagoon rukhsad kaa qaadan.

- **Daawayn, biilal ama lacag bixin, Qorsheynta Ceymiska/Bixista Caafimaadka**

- Daawayn: in lagu daweeyo, maamulo ama la habeeyo caafimaadkaaga iyo arrimaha la xiriira. Takhaatiirta, kalkaaliye caafimaad, farsamo yaqaannada, ardada caafimaadka iyo dad kale oo u xil saaran inay ku daweeyaan waxay wadaagaan macluumaadka ku saabsan caafimaadkaaga. Daweynataada waxaa ka mid ah in lala xiriiro dadka u xilsaaran caafimaadkaaga waqtiga ka horreeyey imaantaada BMC iyo kaddibba. Tusaale ahaan, waxaa dhici karta in BMC ay siiso macluumaaka caafimaadkaaga (1) ambulanska ku keena ama kaa qaada BMC; (2) xarunta _rehabilitationka (dib xxx) or hayadaha guryaha ku bixiya caafimaadka, iyo (3) takhaatiirta kale ee ku daweysa, sida takhtarka kula soo xiriiriyey BMC ama BMC ay kuu dirto ama ay daweyntaadu xilkasaarantahay.

- Lacag bixinta/maal gelinta daweynta: in lagu caawino BMC ama hayadda kale ee ku dawaysa sidii ay u heli lahayd lacagta ku saabsan ceymiska caafimaadkaaga. Maal gelinta waxaa ka mid ah; (1) eegidda inaad xaq u leedahay daweyn ama ceymis gaar ah; (2) in la eego baahida dawaynta ama khidmaha kale; (3) in loo diro biilalkaaga shirkada caymiska.

- Qorsheynta Ceymiska Caafimaadka: in la caawino BMC siday u horumarin lahayd shaqadeeda ama loo kormeeri lahaa habbonaanta cinaayadda ay ku siiso. Tusaale ahaan, waxaa dhici karta inaan isu gaynno macluumaad bukaanka ku saabsan kana yimid meelo kala duwan si loo eego cinaayadda ugu habbon. Waxaan kaloo u isticmaali karnaa macluumaadka ku saabsan caafimaadka si aan u kormeerno xirfadda iyo shaqo wanaagga shaqaalaha, tababarka ardada, si loo sahlo siduu isbitaalku u heli lahaa rukhsadaha shaqada iyo tababarka; iyo sidii loogu suuq yeeli lahaa BMC isla markaan maal gelin iyo taageero loogu heli lahaa. Waxaa dhici karta in aan macluumaadka caafimaakaaga loo gudbiyo shirkadaha nala xiriira nagan caawina biilalka and shirkdaha combiyuutarrada, xisaabiyayaasha, iyo daabacayaashaba. Shirkadaha nala xiriira oo dhani waa inay si qoraal noogu ballan qaadaan inay xafidaan maclumaadka ku saabsan caafimaadkaaga.

- Isticmaallo iyo faafin kale oo la oggol yahay

Waxaa dhici karta in BMC ay isticmaasho and faafiso informeeshanka caafimaadkaaga si ay

- kuu xasuusiso ballamahaaga ku saabsan daweyntaada
- kuugo soo dirto informeeshan ku saabsan noocyo kala duwan oo la isku daweeyo ama arrimo faa'iido caafimaad kuu leh iyou khidmado kale oo muhim kuu ahaan kara.
- kuula soo xiriirto si aad uga taakulayso maaleglinta BMC. Marwalbaba waad ka saari kartaa

magacaaga liiska taakulaynta iyo maalgelinta.

ISTICMAALLO IYO FAAFIN KALE OO U BAAHAN OGGOLAASHAHAAG AMA DIIDMADAADA

Isticmaallada iyo faafinta hoos ku xusan waxay u baahanyihiin oggolaashahaaga ama diidmadaada:

Daaraktariga/Diiwaanka bukaanka: magacaaga, degaankaaga intaad joogtid BMC, xaaladdaada guud iyo diintaadaba waxay ku qoran yihiin daaraktariga BMC. Informeeshanka daaraktariga waxaa loo tabiyaa;

- ragga diinta
- dadka kale ee kugu heybiya magacaaga (laakiin diinta looma sheegayo)

Haddaadan awoodin inaad diidid ama oggolaatid waxaa dhici karta in ay BMC magacaaga ku darto daarakteriga faafisana informeeshankaaga haddii ay dareento in ay taasi faa'iido kuugu jirto adiga. Haddaadse awooddid inaad oggolaatid ama diiddid waxaa lagu siinaya fursad aad ku sheegatid waxaad doonaysid. Marna haddaad diidid in lagugu daro daaraktariga, informeeshankaaga lama siinayo cid weliba oo ku waydiisa, kana mid yihiin aysanna ku koobnayn, ubaxleyaasha, boostaalaha, qoyskaaga, saaxiibbadaa, ragga diinta, iyo ciddii kaloo ku haybinaysa ama rabta inay ogaato qolkaaga.

Dadka ku taxalluqsan ama ay khusayso caafimaadkaaga

- Dadka mas'uulka ka ah cinaayaddaada /caafimaadkaaga ama lacag bixinta daweyntaada sida qoyskaaga, ahalkaa, saaxiibbadaada soke ama qofkii/qofafkii kale oo aad dalbatid.
- Haddaadanse joogin, waxaan si macquul ah u isticmaalaynaa khibraddeena iyo sida ay danti kuugu jirto kaddibna go'aan ku gaaraynaa in aan informeeshanka loo bahanyaha oo keli ah u faafinno qofka sida khaas ah ugu la xiriira/taxalluqsan caafimaadkaaga.

La socodsiin

- In lala socodsiiyo qoyskaaga ama qofkii kale ee mas'uul ka ah caafimaadkaaga degaankaaga, xaaladdaada guud amd geeri.

Kaarisad Ka Kaalmayn deg-deg ah

- Kaalmo fidiyeyaasha dowladda ama khaaska ah ee u sharciyeysan bixinta kaalmooyinkaas.
- Si loo maamulo isticmaalka iyo baahinta dadka ku taxlluqa caafimaadkaaga.

ISTICMAALKA IYO BAAHINTA AANAN U BAAHNEYN OGGOLAANSHAHAADA

Waxaa suurowda in ay BMC isticmaasho ama baahiso macluumaadkaaga caafimaad ee khaaska kuu ah iyadoon kaa helin oggolaasho. Liiska hoos ku qoran wuxuu xusayaa mararka ay arrintaasi dhici karto. Isticmaal iyo faafin waliba kuma xusna meeshan. Hase ahaatee waxaan si tafatiran kuula socodsiinaynaa qaar ka mid ah.

- **Sida uu sharcigu dhigayo**
- **Arrimaha ku saabsan Caafimaadka mujtamaca:** si looga taxaddaro ama loo kontroolo cudurrada, dhaawaca, ama curyaannimada; si loo tabiyo carruur garaacid ama taxaddar xumo; ama siyaabaha kale ee uu sharcigu dhigayo; si loo tabiyo mashaakil ama dhiidhin ku saabsan daawada uu qofku qaadanayo ama mashaakil kale oo ku saabsan

xxxxx; in lala socodsiiyo qof qaaday cudurrada la iska kala qaado.

- In **laga ilaaliyo inaysan khatar halis ah** caafimaadka ama amniga.
- **In shaqaadaada la siiyo** informeeshankaaga is ay u faaqidaan arrimaha ku saabsan cudorrada ama dhaawaca shaqada, ama kormeer caafimaadeed.
- **Sharciga dacwooyinka iyo Mamulka barwooyinka:** Inaad maxkamada u jawabtid mise amarka mamulka. Inad u jawabtid barwad misa codsiga sharciga.
- **Xojinta sababaha sharciga:** Inaad u jawabtid barwada Maxkamadda, in aad cadaysid qofka latuhmay, misa aad u shegtid dembiga ka dhacay BMC dhaxdisa.
- **In aad shegtid tuhunka faraxumeynta iyo ihtimam la aanta.** ee doqoshinka, naafayasha, ama guriga xannaneenta bukaanka. Oona loo gudbiyo wakaaladaha dowladaha ku shaqo leh.
- In aad fuliso sharciyada la xirrira abaalgudka shaqaalaha ama barnaamijyada lamidka ah.
- Hay-addaha aadabta iyo xoojinta sharciga. Hayadda adaabta iyo xoojinta sharciga haddeey ku xirto waxeey mas-uul ka tahay caafimaadkaaga iyo nabadgelyadaada adiga iyo kuwa kugula xiran xabsigaas.
- **Sarkaalka baaritanka caafimaadka:** In uu cadeeyo sababaha dhalisey geerida, iyo inuu fuliyo waajibaadka shaqadiisa eey fareyso..
- **Agaasimayasha qaabilasan Mowdka:** In eey fuliyan waajibaadkooda.
- **Agaasimayasha qaabilasan Mowdka:** In eey fuliyan waajibaadkooda.
- **Hey-adaha ilaalinta cafimadka:**waxey masuuliyaddeeda tahay ineey baraan xisaabaadka iyo dhowritaanka nadaamka caafimaadka ee dowladda ugu talagashay.
- **Tijaaboyinka la isticmaalikarin ogolaansho la-aan:** Dib ugu noqoshada maclumaaka tijaabo diyaarinta.; Tijaabo laxirira maclumadka meydka.; ama ineey okolaadaan tijaabada. Taasna waxeey u bahantahay in dib loogu noqdo arrintaas loona ogolaado.
- **Howlaha gaarka ah ee dowladda:**
  - Howlaha ciidamada: ogolaashaha xukunka ciidamada wuxuu amrayaa;haddaad ka mid-tahay cidanka Mareykanka kuwa gudaha iyo kuwa dibadda ieey fuliyaan nidaamka cidamada.
  - Inay soo ogolaadan sarakisha dowladda: sharci ilaalinta qaranka; inaad siisid nabadgalyo madaxweynaha iyo wixii la xiriiro..

ISTICMAALADDA IYO FIDINTA U BAAHAN IN OGGOLAASHO QORRIIN AH

Isticmaallada iyo fidinta kale ee feylkaaga waxaa la oggol yahay oo keli ah markaa si qorriin ah ku bixiso amar. Baahinta doonaysa inaad si qorriin ah in lagu bixiyo waxaa ka mid ah daweynta daroogada iyo alkolada, cudurrada caqliga, iyo AIDS/HIVga, iyo baaridda informeeshanka genetikada/wiraatikaga ah. Waad ka noqon kartaa mar walba oggolaashaha; laakiinse dib uma soo celin karno macluumaadkii aan hore u bixinnay oggolaashahaaga ka dib. Sidoo kale, kama noqon kartid oggolaasho ku xiriiray ama waajib kugu ahaa si aad caymis u heshid. Ka noqosho waliba waa inay ahaataa si qorriin ah. Kala xiriir Sarkaalka BMC ee Arrimaha

Khaaska ah (BMC Privacy Officer) 617-414-1800.

ISTICMAALLADA IYO SHAAC-BIXINTA U BAAHAN OGGOLAANSHO QORAL AH

Isticmaallada kale iyo shaac-bixinta feylashaada waxay dhici karaan keliya marka oggolaansho qoraal ah lagaa heysto. Shaac-banbixinta u baahan oggolaansho qoraaal ah waxaa ka mid ah feylasha la xiriira ka daweynta khamriga iyo maskax dooriyayaasha, feylasha daryeelka cudurrada maskaxda, cudurka AIDSka/HIV iyo macluumaadka baaritaanka jeneetiga *(genetic testing)*. Waxaa kuu suurtagal ah inaad ka noqoto oggolaansho aad bixisay waqti allaaliyo waqtigaad doonto; laakinse, annaga nooma suurtowdo inaan ka noqonno shaac-bixin oggolaanshahaaga ku saleysan oo aan hore u sameynay. Waxaadan kaloo ka noqon karin oggolaansho aad u sameysay arrimo damaanad awgeed *(insurance coverage)*. Ka noqosho waliba waa inaad si qoraal ah u sameysaa. La xiriir BMC Privacy Officer 617-414-1800.

XUQUUQDAADA KU SAABSAN MACLUUMAADKA CAAFIMAADKA EE KU KHUSEEYA

Wixii ku saabsan macluumaadka caafimaadkaaga ee aan heyno, waxaad xaq u leedahay:

- inaad dalbato in la xadeeyo isticmaalka iyo shaac-banbixinta arrimaha la xiriira daweynta, kharajyada ama arrimaha daryeelka caafimaadka. Arrimahan oo dhan waa inaad u dalbataa si qoraal ah. Sharciga naguma qasbaayo inaan oggolaanno dalab waliba ee xadeyn ah. Waan isticmaali karnaa amaba shaac-bixin karnaa macluumaad xadeysan ama khaas ah haddii loo baahdo gargaar degdeg ah. Xaqa aad u leedahay dalabka xadeynta kama hor imaan karo isticmaalka iyo shaac-bixinta sharciga ku saleysan.
- inaad dalbato in si gooni ah keligaaga lagaala soo xiriiro macluumaadka caafimaadkaaga la xiriira, adiggo dalbanaya habka iyo meesha xiriirkaas uu ka dhacayo. Dalabyada oo dhan waa inaad si qoraal ah u sameysaa. Haddii aan dalabkaaga oggolaanno, waxaan kaaga baahannahay inaad noo sheegto sida kharajyada aad u bixineysid, cinwaan kale ee lagaala soo xiriiri karo iyo habka lagula soo xiriiri karo.
- inaad kormeerto oo aad koobi gareysato macluumaadka sirta ah ee la xiriira caafimaadkaaga oo loo isticmaali karo so loo gaaro go'aannada kugu saabsan. Arrimaha kor ku xusan kama mid aha qoraallada dhakhaatiirta maskaxda *(psychotherapy notes)*, macluumaadka sheybaarka ama macluumaadka horey loo uruuriyay si loogu isticmaalo tallaabo-ka-qaadid ama maxkamadaha rayidka, dembiyada ama maamulka. Xaqan si ku-meel gaar ah ayaa loo joojiyay ilaa si buuxda looga baaraan dego macluumaadka la uruuriyay inta baaritaanka uu socday. Sharciga wuxuu noo oggolyahay inaan kharaj koobiga la xiriira kugu soo dallacno.
- inaad dalbato sixidda macluumaad loo isticmaali karo in go'aan lagaa gaaro. Annaga khasab naguma aha inaan oggolaanno dalabkaaga. Waan diidi karnaa dalabkaaga haddii: (1) BMC aanay qorin macluumaadka, laga reebo haddii la waayo qofkii qoray macluumaadka, sixi kari lahaana; (2) haddii macluumaadka aanay ka mid ahayn macluumaadka BMC ay u hayso in

go'; (3) haddii macluumaadka aanay ka mid ahayn macluumaadka laguu oggolyahay inaad kormeerto ama koobi gareysato; ama (4) macluumaadka ay dhan yihiin, saxna yihiin. Sixidda macluumaadka waa inaad ku dalbataa si qoraal ah adigoo soo bandhigaya sababaha xoojinaya dalabkaaga.

- inaad hesho warbixin ku saabsan shaac-bixinnada qaarkood ee ku saabsan macluumaadka caafimaadkaaga. Xaqa ku saabsan warbixinta ma khuseyso shaac-bixinnada aad adiga oggolaatay ama shaac-bixinnada la xiriira daweynta, kharaj bixinta iyo arrimaha daryeelka caafimaadka.
- inaad hesho, marka aad dalbato, koobi warqad ah ee ku saabsan Warbixintan.

SIDEED XUQUUQDAN UGU DHAQMI KARTAA AMA U HELI KARTAA MACLUUMAAD DHEERAAD AH

Si aad xuquuqdan ugu dhaqanto ama u hesho macluumaad dheeraad ah ee Warbixintan ku saabsan, fadlan la soo xiriir:

BMC Privacy Officer
Boston Medical Center
88 East Newton Street
Boston, MA 02118
(617) 414-1800

SIDEED U ASHTAKOON KARTAA

Haddii aad aaminsantahay in xuquuqdaada shakhsiga ah meel looga dhacay, fadlan la soo xiriir Patient Advocacy Program Telefoon (617) 414-4970.

Waxaad kaloo ashtako u qoran kartaa Wasiirka Wasaaradda Caafimaadka iyo Adeegyada Dadka *(Secretary of the Department of Health and Human Services)*.

BMC marnaba dhibaato kuuma geysaneyso ashtako aad qoratay awgeed.

ISBEDDELLADA KU DHICI KARA WARBIXINTAN

Waxaan xaq u leenahay inaan beddelno Warbixintan. Waxaan kaloo xaq u leenahay isbeddellada ku dhaca Warbixintan inaan ku dabbaqno macluumaadka caafimaadka oo aan kaa heyno iyo kuwa mustaqbalka aan heli doonno. Koobi warbixintan waxaan u diri doonnaa Isbitaalka. Haddii aad beddesho NPP gaaga, waxaad heli doontaa NPP cusub marka soo socota ee aad soo booqato isbitaal BMC ah ama aad aragto dhakhtar.

HealthNet Health Centers

Codman Square Health Center
Dorchester House Multi-Service Center
East Boston Neighborhood Health Center
Geiger-Gibson Community Health Center
Greater Roslindale Medical and Dental Center
Harvard Street Neighborhood Health Center
Health Care for the Homeless
Manet Community Health Center
Mattapan Community Health Center
Neponset Health Center
Roxbury Comprehensive Community Health Center
South Boston Community Health Center
South End Community Health Center
Upham's Corner Health Center
Whittier Street Neighborhood Health Center